Waalidka ama Masuulka Qaaliga ahoow,

Waxaan rabnaa in dhammaan qoysaska haysta carruur ka yar 12 bilood ay ogaadaan waxa dhici kara haddii cudur jadeeco ah uu ka dillaaco barnaamijkeenna ama bulshada dhexdeeda.

Haddii uu **cudur jadeeco ah uu dilaaco**, waaxda caafimaadku waxay uga baahan kartaa qof kasta oo aan muujin karin caddayn difaac si uu (kaga ilaaliyo) jadeecada inuu **guriga joogo ilaa 21 maalmood** kadib marka uu cudurka soo gaaro. Tani waxay gacan ka geysataa joojinta faafitaanka jadeecada.

Carruurta badankood waxay difaac ka helaan tallaalka **measles, mumps, and rubella (MMR, jadeecada, qaamo-qashiirka, iyo rubeelada)**, kaas oo caadiyan la bixiyo ka dib dhalashada koowaad ee ilmaha. **Maadaama ilmahaagu ka yar yahay 1 sano, waxaa laga yaabaa inuu u baahdo inuu guriga joogo.**

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad la hadasho dhakhtarkaaga daryeelka caafimaadka haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan jadwalka jadeecada iyo tallaalka MMR.

Jadeecadu aad bay u faaftaa si dhakhso ah ayayna u faafi kartaa. Waxay sidoo kale sababi kartaa dhibaatooyin caafimaad oo halis ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo Washington State Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington): doh.wa.gov/measles.

Si daacadnimo leh,